ADEEGGA MACLUUMAADKA
Daroogada Ee Waalidka
PARENT DRUG INFORMATION SERVICE (PDIS)

Miyaad ka walwalsan tahay isticmaalka khamriga ama daroogooyinka xubin qoyska ah?

Ma u baahan tahay macluumaad ama taageero?



Taleefankan u dir
9442 5050 ama 1800 653 203
soo wacayaassha tuulooyinka

PDIS waxaa ka shaqeeya la-taliyeyaal xirfad-yaqaano ah kuwaas oo khibrad leh, garasho iyo taageerona leh. Taageerada Waalid ilaa Waalid ayaa kaloo la heli karaa. La-taliyeyaasha PDIS iyo waalidiinta waxay khibrad iyo aqoon u leeyihiin caawinta dadka oo ay hayaan dhibaatooyinka isla nooc ah kuwaas oo laga yaabo inay ku hayaan.

Cid u baahan ma jirto inay ogaato inaad soo wacday oo caawimaad codsatay. **Wicitaankaagu waa mid qarsoodi ah. Macluumaadkaaga cid kale lama siin doono oo uu ka mid yahay boliisku.**

Turjumaano ayaa la heli karaa kuwaas oo lacag la'aan ah.

Fadlan wac haddii PDIS aad doonayso macluumaad iyo taageero.

PDIS – 9442 5050 ama 1800 653 203
soo wacayaassha tuulooyinka.

Email: pdis@health.wa.gov.au
Web: www.dao.health.wa.gov.au
Mail: PDIS, PO Box 126, Mt Lawley, WA 6929
Fax: 9442 5020

Adeegga turjumaanka Afka iyo Qoraalka 131450
Adeegga Wada-xiriirinta Qaran 133677
(kuwa maqalku iyo hadalku ku adag yahay).

Government of **Western Australia**
Drug and Alcohol Office

Waxaa jira noocyo kala duwan oo daroogooyin ah **sida khamriga, tubaakada, daawooyinka dhaqtarku qoro ama farmashiga, cannabis, heroin, amphetamines (xawware, baraf), qaadka,** iyo kuwo kale.

Khamriga iyo daroogadu waxay abuuri karaan dhibaatooyin kuwaas oo saamayn kara cid kasta oo qoyska iyo bulshadaba ah.

Waxay sababi karaan **dibaatooyinka burburka xiriirka qoyska, jirro, dhaawac, rabshad, dambi jariimo ah** iyo kuwo maaliyadeed.

Waa caadi in la dareemo cabsi iyo buuq iyo inaan la hubin waxa la sameeyo marka xubin qoyska ah ay cabto khamriga ama daroogada. La hadlidda cid kale oo fahmaysa arintaas ayaa kaa caawin karta yaraynta walaaca iyo inay kaa caawiso sidaad ula qabsan lahayd.

Caawimaadda waxaa kaa xiga wacidda taleefanka

Haddaad doonaysid inaad la hadasho la-taliye waxaad wici kartaa Adeegga Macluumaadka Daroogada ee Waalidka (PDIS).

Taas waa adeeg lacag la'aan ah oo qarsoodi ah kaas oo la heli karo 24ka saac maalintii, 7 maalmood asbuucii.

Markii aad wacdo waxaad kala dooran kartaa inaad la hadasho:

- La-taliye xirfad-yaqaan ah
- Waalid kale kaas oo khibrad u leh arimaha la midka ah wuxuuna garanayaa dareenkaaga.

Adeegyadan waxay ku siin karaan:

- Mac luumaad ku saabsan sida khamriga iyo daroogadu u saameeyaan dadka
- Talo-siin xubinta qoyska
- Talo-siin sida loola qabsado
- Meel-u-dirid iyo macluumaad ku saabsan adeegyada kale oo wax caawin kara